



## Xuquuqda Ka qaybgalayaasha

- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad cad oo ku saabsan caafimaadkaaga maskaxda iyo daaweyntaada.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad dhamaystiran oo ku saabsan doorashooyinkaaga daaweynta, oo ay ku jiraan xulashooyin kale iyo daaweynta aad adigu samayn karto
- Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato khatarta, faa'iidooyinka, iyo natijoooyinka suurtagalka ah ee daaweyntaada, oo ay ku jirto doorashada inaad helin daaweynta.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho adeegyo ku habboon da'daada iyo dhaqankaaga meel fudud oo adiga kuu sahlan inaad tagto.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho adeegyo adigoo la takoorin iyadoo lagu saleynayo jinsiyaddaada, aaminsanaantaada, meesha aad ka timid, diintaada, jinsigaaga, jihada galmada, da'da, ama naafonimadaada
- Waxaad xaq u leedahay inaad diintaada ku dhaqanto, ilaa aysan saameyn ku yeelan dadka kale ama daweeyntaada. Sidoo kale waxaad xaq u leedahay inaad diido hawlo diimeed kasta.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho caawimaad iyo taageero haddii aad leedahay naafo, dhibaato ku haysato isgaarsiinta, ku hadasho Ingiriisi xaddidan, ama aad leedahay baahiyo dhaqan
- Waxaad xaq u leedahay inaad codsato turjubaan shahaado leh iyo agabka turjumaadda adigoo wax kharash ah lagaa qaadin.
- Waxaad xaq u leedahay in lagugu dhaqmo ixtiraam, sharaf, iyo asturnaana, iyadoon loo eegin jinsiyaddaada, jinsigaaga, heerka askariga, diintaada, xaaladda gurka, meesha aad ka timid, naafonimadaada, da'daada, jihada galmada, ama asalkaaga.
- Waxaan ixtiraamnaa sharafka iyo madaxbannaanida qof kasta oo aan u adeegno. Si loo ilaaliyo rugta caafimaadka, shaqaaluhu waxay hubin karaan walxaha halista ah oo kaliya marka loo baahdo si ay adiga ama dadka kale u ilaaliyaan. Baaritaannadani waxay noqon doonaan kuwo sida ugu dhakhsaha badan oo gaar ah, lagu sameeyo inta lagu jiro qaadashada ama haddii ay jirto walaac badbaado oo dhab ah. Hadafkeenu waa in aan yareyno waxyeelada, taageerno soo kabashada, lana bixino daryeel si ixtiraam leh.
- Waxaad xaq u leedahay inaad waligaa la xirin ama la go'doomin ciqaab ahaan, si ay shaqaalaha u fududaato, lagu qasbo inaad wax samayso, ama aargoosi ahaan.
- Waxaad xaq u leedahay inaad doorato bixiye caafimaad oo u qalma marka uu diyaar yahay, oo uu caafimaad ahaan loo baahan yahay.
- Waxaad xaq u leedahay in macluumaadkaaga shakhsiga iyo caafimaadka la qariyo, iyadoo la raacayo dhammaan shuruucda sirta ee gobolka iyo federaalka.
- Waxaad xaq u leedahay inaad u warbixiso gobolka haddii aad aaminsan tahay in hay'addu jebisay xeerka adeegyada caafimaadka dhaqanka.
- Waxaad xaq u leedahay inaad ka xorowdo xadgudub galmo iyo nooc kasta oo ka faa'iideysi, oo ay ku jiraan jireed ama dhaqaale

- Waxaad xaq u leedahay inaad ka qayb qaadato go'aamada ku saabsan daryeelkaaga, oo ay ku jiraan ka caawinta samaynta qorshaha daaweynta iyo helitaanka nuqul haddii aad rabto, diididda daaweynta, iyo la wadaagista rabitaankaaga daryeelka mustaqbalka.
- Waxaad xaq u leedahay inaad sameysato oo sii hayso amar horumarsan oo ku saabsan caafimaadka maskaxda sida uu dhigayo sharciga gobolka. Tani waxaa ka mid ah helitaanka caawimaad si loo sameeyo mid iyo doorashada qofka kuu samayn doona go'aannada caafimaad haddii aadan awoodin.
- Waxaad xaq u leedahay inaad eegto diiwaankaaga caafimaad ee maamulaha ama qofka uu wakiil ka dhigay oo aad codsato isbeddel ama saxid.
- Waxaad xaq u leedahay inaad codsato oo hesho nuqul ka mid ah diiwaankaaga caafimaad iyo in lagugu wargeliyo haddii ay jirto wax kharash ah.
- Waxaad xaq u leedahay in lagugu sheego xuquuqdaada markaad bilowdo adeegyada iyo mar kasta oo aad codsato. Xuquuqdaas mar walba waa la ilaaliyaa.
- Waxaad xaq u leedahay inaad isticmaasho xuquuqdaada adigoo la ciqaabin ama si cadaalad darro ah lagugu dhaqmin.
- Markaad bilowdo adeegyada ama mar kasta oo aad waydiiso, waxaan ku siin doonaa macluumaad ku saabsan sida loogu sheego gobolka haddii aad u malaynayso in xuquuqdaada aan la ixtiraamin.
- Haddii aad u baahan tahay caawimaad xuquuqdaada, iyadoon loo eegin caymiskaaga, dakhligaaga, awoodda bixinta, ama meesha aad degan tahay, waxaad la xiriiri kartaa:
  - Wacitaanka Xafiiska Difaaca Caafimaadka Dhaqanka: 1-800-366-3103.
  - Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah <http://www.hhs.gov/ocr>.